Waaxda Adeegga Bulshada Tennessee
Arjiga Caawinaada Qoysaska
ISTICAALKA DULEELKAN WAB AYAA LEH

Case #: _____
Date received: _____
County: _____

Arjiga waan kaa gudoomi doonaa iyada oo ay ku qoran yihiin magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga kaliya haddii aad dalbanaysid SNAP/Kuubannada Cuntada (Food Stamps) kaliya. Laakiin marka aad si dhameystiran u buuxiso, waxay suurtogelinaysaa in aan si dhaqso ah kuugu sheegno haddii caawinaad aad heli karto. Haddii laguu ogolaado, manfacyadaada waxay bilaabi doonaa taariikhda aad arjiga buuxisay. Badanaaba waxaad u baahnaan doontaa in aad la hadasho shaqaale ka socda WAB si loo dhameystiro socodsiinta arjiga.

Waxaa laga yaabaa in 7 maalmood aad ku hesho SNAP/Kuubannada Cuntada haddii:

1. Haddii daqliga qoyskaaga ee bishiiba ka yar yahay $150, oo hadda aad leedahay ilo kaasoo gasha $100 ama ka yar.
2. Qarashkaaga ijaarka (qarashka isticmaalka telfoonka, korontada) uu ka badan yahay daqligaaga bisha iyo keydkaaga.
3. Aad ka shaqeyso shaqooyinka xiliyada ama soo galootiga.

Haddii ay ku hayso la'xaad daro oo adkayneysa in aad buuxiso ama aad fahamto arjigaan, waan kaa caawin karnaa. Waan ku soo wici karnaa ama waan ku soo booqan karnaa haddii aadan xafiiskayaga aadan iman karin.

Magaca	**Waxaan codsanayaa:** **Caymiska Caafimaadka ee TennCare Medicaid iyo** **___SNAP/Kuubannada Cuntada ___Mudnaanta Qoysaska (Families First)** **___Caawinaad xaga qarashka Medicare ka QMB/SLMB/QI)**
Ciiwaanka Guriga **Magaalada Gobolka Sumada Boostada (Zip Code)**	Waxaa laga yaabaa in telfoonka guriga ama gacanta soo wacno si aan balanta kuu xusuusino. Fariin ayaan kuu duubi doonaa haddii aadan jawaabin. **Talefoonka Guriga** | **Talefoonka shaqada** | **Tel gacanta/Mid kale**
Cinwaanka Warqadaha lagu soo diro (haddii uu ka duwan yahay) **Degmada Gobolka Sumada Boostada (Zip Code)**	Waxaan isticmaalnaa Lambarada Soshal Sekiyuuritiga si loo hubi in adigu aad tahay qofka aad sheeganayso. Waxaan u isticmaalnaa si aan u hubino in aad heshid cadada caawinaad ee xaqa uleedahay, la bedello cadada caawinaad ee aad hesho, loo hubiyo diiwaangelinta kombiyuutarada dowlada kale, iyo in la hubiyo in aad xaq u leedahay. Waxaan hubinaa Soshal Sekiyuuriti, IRS, iyo diiwaangelinta shaqada. Waxaa dhici karta in aad ka hubiyo diiwaangelinta Laanta Socdaalka iyo Dhalashada. Haddii diiwangelintan aysan iswaafaqsanayn waxa aad dhahayso, saameyn ayay ku yeelanaysaa haddii aad heli la'hayd caawimaad iyo inta lacag ama Kuubannada Cuntada ee heli la'hayd. Haddii ulakac been usheegto si aad caawinaad uheshid, waxaa laga yaabaa in aad xabsi aado.

Miyaad ubaahan tahay turjumaan?
( ) Haa ( ) Maya

Haddii haa tahay, luqaddee? _____

Uma baahnid in aad inoo sheegto jinsiga ama dadyowga aad ka soo jeedo. Laakiin waxay waamineysaa in ay muujiso haddii Gobolka uu raacayo sharciga xuquuqda dad-weynaha.

Fadlan kuwa soo socda isticmaal si aad jinsigaaga usheegto: **W** = Caddaan/ Yurubiyan, **B** = Madow/Afrikan-Amerikan, **A** = Aasiyan, **H** = Hawaiian Dhalad/Jasiirada Pacific, **I** = Cali Beesteen/Alaska Dhalad

Xaaladdaada Guur: Isticmaal mid ka mid ah kuwa soo socda ee dadka waweyn ee xubin kasta ee aqalka qoyskaaga: **xaasle, doob, kala tagey, carmal, kala maqan**

Qor qof kasta ee aqalka qoyskaaga (adigana isku dar) Dad badan si aad ugu darto, fadlan arjiga kale ama warqad ku soo qor oo ku lifaaq	**Manfac miyuu dalbanaya qofkan? (Haa/Maya**	(**Looma** baahna in aad ku qorto haddii qofka uusan rabin inuu manfac helo) Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, eeg bogga 1 ee Bayaanka Ismahamka		**Jinsi (Lab/ Dheddig)**	**(Buuxinteeda waa Ikhtiyaar) Calaamadda Saxda saar haddii Isbaanish/Latino yahay Latino**	**(Buuxinteeda waa Ikhtiyaar) Jinsi (Kor eeg) Kuqor dhammaan kuwa quseeya**	**Xaaladdaada Guur (Kor eeg)**	**Taarikhda Dhalashada**	**Calaamad-da saxda ah saar haddii qofkan ay uur leedahay**	**Calaamad-da saxda ah saar haddii qofkan la'xaad daro uu qabo**
		Lambarka Soshal Sekiyuuritiga	**Calaamade had-dii qof-kan uu qatey dhalaso Marykan**							

Waxaan ku dhaaranayaa iyada ciqaab lagu mutaysan karo beenta (beesheegida adigoo lagu dhaariyay) iyo dhammaan ciqaabyada kale la mutaysan karo in qoraalka aan arjigan ku qorey, kuwa kulifaaqan, iyo qofkasta oo iwareysan doono yahay mid run oo sax ah. Dhammaan shaqsiyaadka caawinaada codsanaya ama kuwa qaataba yihiin muwaadin Mareykan, sharci wadanka ku joogo, ama soo galooti xaq uleh. Waan ogsoonahay oo waan kuu raacsan nahay shuruudaha iyo macluumaadka la i siiyay. Haddii la i weydiiyo, waxaan bixin doonaa macluumaad caddeynaya qoraalkayga, ama WAB waxaan fasax u siiyay in ay caddeyn la timaado. Waan ogsoonahay in la iigaga baahan yahay in aan WAB u soo sheego isbadel kasta oo xaaladdayda ku yimaada.

Bixinta: Gobolka Tennessee ama dadka ushaqeeya waxaa laga yaabaa in ay ubaahdaan in ay caddeeyaan in macluudka aan siiyay yahay run. Aniga oo saxiixaya warqaddan, waxaan leeyahay waa yahay in caddeyso. Tani waxay u ogolaandoontaa haddii aan heli doonto Kuubannada Cuntada, Mudnaanta Qoyska, ama Caymiska TennCare Medicaid ka. Sidoo kale waxa aan halkan ka oranayaa in aan aqriyay oo aan fahmay Bayaanka Heshiiska Isfahamka

Saxiix: _____ Taariikhda: _____ Markhaati (haddii X lagu saxiixay): _____Taariikhda: _____

Mas'uul ama Wakiil Matala: _____ Tariikhda: _____

SANDUUQAN WAA kuwa buuxsanaya Mudnaanta Qoyska kaliya: Idan lagu sii bixinayo diiwaangelinta isa soo xaadirista iskuulka

Aniga (macmiilka) waxaan iskuulka aan idan u siinayaa in ay bixiyaan diiwaangelinta soo xaadiritaanka caruurteyda ee la socda arjigan la siiyo Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee oo ay bixiso Waaxda Waxbarashada ee Tennessee ama iskuulka canugayga. Waaxda Adeega Bulshada diiwaangelintan way isticmaali doontaa, iyadoo ay la socoto lambarada soshal sekiyuuritiga, in ay iga caawiso inaan ka soo baxo waajibaadyadeyda Mudnaanta Qoyska. Diiwangelinta waa la baabi'in doonaa ka dib markii la dhamaysto oo aanan loo baahnayn.

Saxiix: _____ Taariikhda: _____

Waan ogsoonahay in aan leeyahay hal ama laba ah wakiilo imatala:

oo aniga manfacyadan ii dalbi kara: Kuubannada Cuntada ( ); Mudnaanta Qoyska ( ); Caymiska TennCare Medicaid ( )

_____Ii isticmaali kara manfacyadeyda Kuubannada Cuntada ( ); ii isticmaali kara manfacyadeda Mudnaanta Qoyska ( )

oo aniga manfacyadan ii dalbi kara: Kuubannada Cuntada ( ); Mudnaanta Qoyska ( ); Caymiska TennCare Medicaid ( )

_____ Ii isticmaali kara manfacyadeyda Kuubannada Cuntada ( ); ii isticmaali kara manfacyadeda Mudnaanta Qoyska ( )

Waxaa laga yaabaa in Kuubannadaada Cuntada la joojiyo haddii:

Xaqiiqda aad been ka sheegto ama qarisho si aad u hesho manfacyada Kuubannada Cuntada;

* Aad isticmaasho Kaarka Manfaca ee qof kale lee yahay iyaga oo aan idan ku siin;

*Manfacyada Kuubannada cuntada ku soo iibsato waxyaabo kale sida biir, sigaar, ama saabuun.

Haddii aad shuruudahan jebiso, ma heli doontid manfacyada Kuubannada Cuntada ilaa:

Marka koowaad 1 sano, marka labaad 2 sanadood, marka seddexaad abidkaaga.

Haddii aad manfacyada Kuubannada Cuntada ku baddelato daroogo. Manfacyada waxaa lagaa jari karaa ilaa:

Marka koowaad 2 sanadood, marka labaad abidkaaga.

Abdkeedaba waa lagaa jarayaa Barnaamijka Kuubannada Cuntada haddii ay maxkamadda kugu caddeyso in aad gashey dembi ah:

* Manfacyada Kuubannada Cuntada aad ku baddelatay qori, rassaas, ama waxyaabaha qarxa.

*Aad iibinayso manfacyada Kuubannada Cuntada ee udhigma $500 ama ka badan.

Been haka sheegin qofka aad adigu tahay ama halka aad ku nooshay si aad u hesho Kuubannada Cuntada. Beensheegista waxay kuu keeni kartaa in Kuubannada Cuntada aadan 10 sanadood helin.

Qor laba qof oo aan la xiriirno kuwaasoo xaaladdaada wax inooga sheegi kara:

Magaca:_____ Telfoon: _____

Magaca:_____ Telfoon: _____

Xubnahan ku nool aqalkeyga qoyska waxaa lagu heley dambi-wayn iyagoo daroogo haysta, isticmaalaya, ama iibinaya.

_____

Ma waxaad iminka jirtaa 18-24 jir, OO ma dowladda gobolka ayaa caruur ahaantaadii ku soo korisey? (Mid calamadee) ( )Haa ( )Maya

Qor Qoyska <u>ILLAHOODA</u> dhaqaale (lacag naqdi, mid keydsan, jeekinka, ama koontada bangiga, keydsan, saaniyad, boond, mujuwal fands, koontooyinka howl-gabka, tarasta fands, dqiimo & qaayo leh, aqli-sanadle, ama hanti kale.)

Nooca:_____ Qiimaha: $_____ Nooca:_____ Qiimaha: $_____

Nooca:_____ Qiimaha: $_____ Nooca:_____ Qiimaha: $_____

Sanduuqyada hoose ku qor macluumaad ku saabsan <u>DAQLIGA</u> aqalka qoyskaaga. Daqliga wuxuu noqon karaa balse kuma koobna kan shaqada, kan iskaa- aad ushaqeysto, masruuf, masruufka ilmaha, manfacyada dadka tabarta-daran, Soshal Sekiyuuriti/Daqliga Soshal Sekiyuuratiga, Magdhawga Shaqada, Manfacyada aagamuudo, lacagta howl-gabka, mushaar, iyo daqli dulsaar ah

SU'AALAHAN SANDUUQA KU QORAN KA JAWAAB HADDII AAD DALBANEYSO CODSANAYSO TENNCARE/MEDICAID

Adiga ama saygaaga/xaaskaaga haystaa/sataa masaruuf ama daqli sanadle (annuity) oo aad iibsatey Febraayo 8, 2006 ama wixii ka dambeeyey? ( )Haa ( )Maya **WAA in aad haa ama maya calamadeysaa** *(Daqli-sanadlaha waa lacag joogto laguu siiyo oo ka timaada keyd miisaaniyad lacageed oo qof meel kuu dhigey sida in daqli kaaga yimaada oo aad mustaqbalka u isticmaasho)*

Shaqsi Daqli soo galo	**Daqliga halka ka soo galo (sida shao, Soshal Sekiyuuriti, masruufka ilmaha)**	**Intee lacag canshuurta/ qarashaadka ka hor**

Miyaad qaadatay lacag gaaraysa $100,000 oo kaaga timid Gorgortan Koox Qareeno kuu sameeyeen sanadka 1998? ( )Haa ( )Maya Haddii aad iminka qaadato jeeg Soshal Sekiyuuriti, sidoo kale miyaad 1972 qaadanaysey jeeg Soshal Sekiyuuriti ( )Haa ( )Maya Miyaa lagaa jaray Medicare sababtoo ah shaqo ayaad ku laabatay oo daqligaaga wuxuu noqday xadka daqli ee Soshal Sekiyuuritiga mid ka badan? ( )Haa ( )Maya			

Qarashaadka Daryeelka Caruurta

Inta aad sitimaankii bixiso: $ _____

Magaca qofka xanaanada bixya: _____

Qarash Hoyga

Ijaar /Deenta Guryaha (mid goobaabi geli)

Bishiiba meeqaa. $ _____

Gaas/Koronto $_____ bishiiba

Telfoon $ _____ bishiiba

Qarash Daawada

Ku qor qarashka daawada sida takhtarka tan uu qor ama lacagta joogta ah ee caymiska la siiyo. Kuwani waxay kaa caawinayaan Kuubannada Cuntada oo bada aad hesho haddii aad tahay qof da' ah ama itaal-daran.

Nooca: _____ $_____bishiiba

Nooca: _____ $_____bishiiba

Masruufka ilmaha ee aad Bixiso

Haddii aad masaruufka ilmaha aad siiso canug ama caruur oo aadan adiga kula nooley, halkan ku qor:

Canug: _____
$_____bishiiba

Canug: _____
$_____bishiiba

Sida waafaqsan sharciga dowladda dhaxe ee Mareykanka Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA) iyo Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka (HHS), hay'adan waxaa ka mamnuucan in ay takoorto ayada oo sal uga dhigeysa jinsi, midab, asal qaran, lab/dhiddig, and da', diin, siyaasad ahaan wax uu qofka aamisan yahay ama la'xaad daro. Hoosida timaada Xeerka Kuubannada Cuntada iyo sharciga USDA, takoorta waa mamnuuc sidoo kale ayada oo loo sal looga dhigo diin ama aaminsanaan siyaasad.

Si aad u soo gudbiso cabasho takoor, la soo xiriir USDA ama HHS. Adiga oo u soo qora USDA, Director, Office of Civil Rights, 1400 Independence Avenue, S.W., Washington, DC 20250-9410 ama soo wacl (800) 795-3272 (cod ahaan) ama (202) 720-6382 (TTY). Usoo qor HHS, Director, Office for Civil Rights, Room 506-F, 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201 ama ka wac (202) 619-0403 (Cod ahaan) ama (202) 619-3257 (TTY). USDA iyo HHS waa loo shaqeeye fursadda u wada sima shaqaalaha iyo kuwa bixiya.

Sidoo kale waxaad u soo qori kartaa Tennessee, DHS, Office of General Counsel, Citizens Plaza Building, 400 Deaderick Street, Nashville, TN 37243, (615) 313-4700.

Diiwaan-gelinta Coddeynta

Ma diiwaangashan tahay in aad ka coddeyso halkan aad deggan tahay? ( )Haa ( )Haa
Miyaad jeceshahay in coddeynta isu diiwaangeliso? ( )Haa ( )Maya
Ma jeceshahay in WAB ay kuusoo dirto foormka diiwangelinta coddeynta? ( )Haa ( )Maya

Manfacyada laga yaabo in aad ka hesho xafiiska WAB isma baddeli doonaa haddii aad isdiiwangeliso in aad coddeyso ama in kaleba.

Nuqulka Macmiilka

Ma ubaahan tahay in wax isbaddel ah inoo sheegto? Ma qabtaa su'aal?
Ma u baahan tahay caawinaad? Na soo wac. Wacidaan waa bilaash.
Xarunta Adeegga Gaargaarka Qoyska
1-866-311-4287
Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawino laga bilaabo 7 a.m.laa iyo 5:30 p.m. Isniin ilaa iyo Jimce.

Bayaanka Isfahamka – Shuruudaha Barnaamijka
Waa Muhiim – Warqaddan Xafid!

Haddii aad qabto itaal-la'aan oo aad u baahan tahay gaargaar gaar ah, fadlan nala soo socodsii.

TURJUMAANO BILAASH AH -- Haddii af Ingiriisiga aadan si wanaagsan u fahmeyn oo aad caawinaad u baahan tahay, fadlan nala soo socodsii. Waxaan kuu keeni doonaa turjumaan kaa caawin doona in aad nala hadasho. Adeeggan waa mid bilaash ah. Keensashada turjumaanma aha mid dib u dhac u keenaysa kayskaaga. Weli arjigaaga waan kaa guddoomi doonaa maanta.

Waxaad codsan kartaa Mudnaanta Qoyska (Families First), Kuubannada Cuntada (Food Stamp), ama Caymisyadda Caafimaad ee (Medicaid/TennCare Standard) oo aad qadka itarneetka ah ka buuxin karto (online) ama xafiiska Waaxda Adeegyada Bulshada (WAB) Waa in arji la buuxiyaa. Waa in aad na siisaa caddeyn ah qofka aad tahay, dakhligaaga, iyo xaqiiqooyin kale ee loo baahan yahay si loo ogolaado arjigaaga. Haddii aad caawinaad uga baahan tahay in aad caddeynta aad hesho, weydii shaqaalaha kiiskaaga ee WAB.

- **Qofkasta oo ka tirsan aqalka qoyska oo dalbanaya manfacyada Mudnaanta Qosyks, Kuubannada Cuntada ama manfacyada Caadiga ee Medicaid/TennCare** waa in ay na siiyaan Lambarka Soshal Sekiyuuritiga ama sharcigooda dhalashada ama laanta socdaalka**.** The eerka Nafaqada iyo Cuntada wuxuu noo ogolaadaa in Lambarada Soshal Sekiyuuritiga aan isticmaalno si aan markaa u hubino in aad heleyso caddada saxda ah ee gaargaar, la beddelo caddada saxda ah ee aad hesho, si aan uga fiirino diiwaangelinta dowladda iyo kombiyuutarada, iyo si aan u hubino in aad gargaarka u qalanto. Goorta aan diiwangelinta kombiyuutarka ka eegeyno, waxaan isticmaalnaa Nidaam Lagu Cadeeyo Xaq u la'haanshaha Daqliga. Haddii diiwaangelintan aanan la mid ahayn wax aad noo sheegeyso, waxaa laga yaabaa in ay wax yeelo ay u geysanayso haddii aad caawinaad heli la'hayd iyo haddii kale iyo inta lagu siin la'haa. ama Haddii aadan haysan Lambarka Badbaadada Bulshada, waan ku caawin karnaa in aad mid weydiisato.
- Haddii aad haysato Lambarka Badbaada bulshada, oo aad adiguna tahay muwaadin Mareykan ah, haysta sharci degnaansho ama soo galooti xaq u leh, markaa waa in aad manfacyada aad dalbataa haddii aad tahay xubin qoyska ka mid ah.
    - Sayga/xaaska iyo caruurta iyo waalidiintooda waa in ay isla soo dalbadaan, aysan ka ahayn haddii aad iska dhaafeyso in aadan u dalabto manfacyada qof aanan dooneyn in uu bixiyo Lambarada Soshal Sekiyuuritiga (SSN) ama xaaladdooda degnaansho.
- Xafiiska WAB **uma baahna** lambarka Badbaada Bulshada ama sharciga dhalashada/soo galootiga si xubnaha qoyska ay manfacyo u dalbadaan. Haddii Lambarada Soshal Sekiyuuritiga uu la yimaado qof aanan ka ahayn qofka manfaca dalbana, looma dirayo Waaxda Socdaalka iyo Dhalashada (Immigration and Naturalization Services) si loo caddeeyo xaaladdooda degnaansho
- Waad dalban kartaa manfacyada ee mawaadinniita iyo xaq u la'haanshaha soo galootiga xitaa haddii aadan adiga dalbanayn manfacyada.

Shaqsiyaadka aanan manfacyada dalbanayn weli waa loo texgelinayaa dalqigooda iyo ilahooda dhaqaale

Haddii aad caawinaad ka dalbanayso xafiiska WAB, waxaa laga yaabaa in aan Lambarkaaga Badbaada Bulshada aan siino:

- Bilayska kuwa raadinaya in ay sharciga jabinaya goorta sharciga inoo ogol yahay ama inooga baahan yahay ama goorta ay maxkamadda inagu amarto.
- Hay'addaha kale ee dowladda dhexe ama gobolka haddii sharciga inoo ogol yahay ama inooga baahan yahay in aan sameyno.

Ilaa intee ayay qaadataa in aad go'aan ka gaartaan arjigeyga?

- Caymiska Caafimaad ee: Waxay inagu qaadanaysaa 45 ama 90 maalmood midkooda in aan go'aan ka gaarno haddii aad maanfacyo aad heleyso. Shaqaalaha kiiskaaga ayaa kuu sheegi doona muddada uu kiiskaaga uu qaadan doono. Caymiska Caafimaad ee (TennCare Standard) ka waxaa laga yaabaa in muddo dheer ay qaadato.
- Manfacyada Mudnaanta Qoyska ee lacagta naqdiga: Waxaan haysanaa 45 maalmood in aan go'aan uga gaarno haddii lagu siin karo.
- Kuubannada Cuntada: Badanaa waxaan haysanaa 30 maalmood in aan ku go'aamino oo aan ku siinayno Kuubada Cuntada (haddii aad u qalanto).
- Si waqtiga loogu talagaley go'aan loo gaaro, xafiiska WAB waa inaad inaga kaalmeysaa inaan helno dhamaan caddeynmaha aan u baahan nahay.

Shaqaalaha kiiskaaga ayaa kuu sheegi doona isbadellada lagaa doonayo in aad soo sheegto. Haddii aad qaadato caymiska caafimaadka ee TennCare/Medicaid ama Mudnaanta Qoyska, waa in aad 10 maalmood gudahooda ku soo wargelisaa WAB (Waaxda Adeegga Bulshada) isbadel kasta ee ku yimaada xaaladdaada deegaan.

Haddii aad qaadato Kuubannada Cuntada waa in aad soo sheegtaa goorta daqliga ku soo gala bisha dhaafo Xadka Daqliga Guud ee Kuubannada Cuntada ee aqalka qoyskaaga. Shaqaalahaaga ayaa kuu sheegi doona waxa ay tahay caddada. Isbadelkan waa in aad nagu soo wargelisaa bisha xigta 10 ka dib marka isbadelka uu dhaco.

Warbixinta Kuubannada Cuntada:

Manfacyada Kuubannada Cuntada wax kama baddeleyso manfacyadaada Mudnaanta Qoyska. Haddii ay joogsato lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska, weli waad heli kartaa manfacyada Kuubannada Cuntada. Laakiin haddii aad bilowdo in aad hesho Mudnaanta Qoyska, markaa waxaa laga yaabaa in manfacyada Kuubannada ada Cuntada ay hoos u dhacdo. **Waa lagugu soo wargelin doonaa isbaddelkan; hase-yeeshee, waxaa laga yaabaa in aad wargelintan aad hesho in ka yar toban maalmood ka hor inta Kuubannadaada Cuntada aysan hoos u dhicin.**

Waxaa laga yaabaa in Kuubannadaada Cuntada ay dhamaadaan ama la joojiyo haddii aad adigu:

- Xaqiiqada aad been ka sheegto ama aad qarisho si aad u hesho manfacyada Kuubannada Cuntada.
- Aad isticmaasho Kaarka Ammaanka Manfaca ee qof kale lee yahay iyaga oo aan idan ku siin;
- Manfacyada Kuubannada Cuntada cuntada ku soo iibsato waxyaabo kale sida biir, sigaar, ama saabuun.

Haddii aad shuruudahan jebiso, ma heli doontid manfacyada Kuubannada Cuntada ilaa:

- Marka koowaad 1 sano
- Marka labaad 2 sanaddood.
- Marka seddexaad weligaaba.

Haddii aad manfacyada Kuubannada Cuntada aad ku baddelato daroogo ama maandooriye. Manfacyada waxaa lagaa jari karaa ilaa:

- Marka koowaad 2 sano
- Marka labaad weligaaba.

Abdkeedaba waa lagaa jarayaa Barnaamijka Kuubannada Cuntada haddii ay maxkamadda kugu caddeyso in aad gashey dembi ah:

- Manfacyada Kuubannada Cuntada u baddelatay qori, rassaas, ama waxyaabaha qarxa.
- Aad iibinayso manfacyada Kuubannada Cuntada ee udhigma $500 ama ka badan.

Manfacyada Kuubannada Cuntada ma heli doontid ilaa toban (10) sanaddood haddii been ka sheegto qofka aad adigu tahay ama halka aad ku nooshahay si aad u hesho manfacyada Kuubannada Cuntada.

Haddii aadan raacin qorshahaaga Mudnaanta Qoyska, waxaa laga yaabaa in aan kaa jarno lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska ama manfacyada Kuubannada Cuntada ayaa waxaa laga yaabaa in lagaa yareeyo.

Haddii aad ka warbixin daqligaaga shaqada ama lagugu helo in aad jebisey shuruudaha Barnaamijka Kuubannada Cuntada adiga oo ulakac u sameeyey, waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto in aad soo celiso haddii aad qaadatay manfacyo badan oo Kuubannada Cuntada ah.

Dadka jebiya shuruudaha waxaa dhici karta in ay xabsi u aadaan, ee uu qabto sharciga dowladda dhexe, ama la ganaaxo ilaa iyo $10,000 ah.

Xubnaha qoyska qaar ka mid ah waa in ay iska diiwaangeliyaan shaqo haddii ay doonayaan in ay helaan Kuubannada Cuntada. Shaqaalaha kiiskaaga ayaa kuu sheegi doona qofka hoygaaga jooga ee u baahan in iska diiwangeliyo si aad ugu qalantaan. Haddii tani ay dhacdo, waa in aad wareysi ugu tagtaa Waaxda Hormarinta Shaqada iyo Shaqaalaha (Department of Labor and Workforce Development) (DOLWD). Waxay ku weydiin doonaan shaqooyinkaagii hore oo waxay kaa caawin doonaan in ay kuu diyaariyaan si aad shaqo ku hesho.

Waxaa laga yaabaa in aad hesho manfaco badan ee Kuubannada Cuntada haddii aad hayso caddeymo ah qarshyo noocan ah sida:

- Caafimaad
- Daryeel caruur ama qof adiga kugu tiirsan
- Masaruufka caruurta
- Hoy ama qarashka isticmaalka biyaha, korontada, iwm.

Shaqaalahaaga xafiiska DHS ayaa kaa caawin kara in aad hesho caddeymo. Laakiin waa in aad na soo wargelisaa qarashyada oo caddeymo aad na tustaa. Haddii qarashkan aadan inoo sheegin oo aadan na siin wax caddeyn ah, waxaan u qaadan in aadan doonayn Ka dhimista oo ma haleysid manfacyada Kuubannada Cuntada dheeraad ah.

Macluumaadka Mudnaanta Qoyska:

Haddii aad qaadato lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska ee aadan u qalmayn, waa in aad Gobolka dib ugu soo celisaa. Waxaad kartaa:

- In aad ka bixiso lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska.
- Lacag naqdi ahaan in aad ku bixiso, haddii aadan qaadan Mudnaanta Qoyska.

Haddii aad been sheegto ama xaqiiqda aad qariso si aad u hesho lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska, maxkamadda ayaa lagu saari karaa. Waxaa lagu eedeyn karaa been abuur (adiga oo dhaar qaba been sheegay), xatooyo ama dembi kale, oo waxaa laga yaabaa in waqti lagu xero oo aad xabsi ku gasho. Haddii aad si ulakac ah u jebiso jebiso shuruudaha Mudnaanta Qoyska, tani waxaan ugu yeeraanaa Xadgudub Barnaamijka oo Ulakac ah. Haddii dambi lagugu helo, waxaa manfacyada Mudnaanta Qoyska lagaa jari karaa ilaa:

- Marka ugu horeyso 6 bilood
- Marka labaad 1 sano
- Marka seddexaad weligaaba.

Waa sharci daro in aad laba gobol isla mar ka wada qaadato lacag naqdi ah. Qof kasta oo sidaa sameeya waxaa laga yaabaa in lacagta naqdiga laga jaro ilaa iyo 10 sanadood.

Caruurtaada way heli karaan manfacyada Mudnaanta Qoyska <u>AMA</u> manfacyada Kuubannada Cuntada laakiin adiga ma heli kartid haddii aad adigu tahay:

- Dambiile cararaya
- Maxbuus edeb lagu daayay ama xad gudub ku sameeyey tijaabo lagu eego edebta maxbiislaha
- Dambi daroogo la xiriira lagu heley dambigaasoo la galay inta ka dambeysa 22 Agoosto, 1996, aysan ka ahayn adiga oo ka soo baxa waxyaabo gaar ah.

Shaqaalaha kiiskaaga ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha ka baxsan.

Si loo helo lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska, waa in aad saxiixdaa oo aad raacdaa Qorshaha Mas'uuliyadda Shaqsiga. Qorshahan waxaa laga yaabaa in uu kaaga baahan yahay in aad aado howlo shaqo la xiriira.

<u>Macluumaad Muhiim ah oo ku saabsan Masruufka Caruurta iyo Mudnaanta Qoyska:</u>

Waxaa laga yaabaa in aad isla mar aad wada hesho lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska iyo masaruufka caruurta. Haddii aad qaadato Mudnaanta Qoyska, waa in aad inaga caawisaa in aad inoo cadeyso canuga aabaha dhalay. Sidoo kale waa in aad nala shaqeysaa si aan uga qaadno masaruufka canuga ee caruurta hela manfacyada Mudnaanta Qoyska. Iskuma dayi doono in aan masaruuf ka urrurino haddii aad inoo caddeyso in ay jiraan sababo wanaagsan oo ah in aanan taa sameyn. Dhamaan masruufka ilmaha waa in marka hore gacanta loo geliyaa xafiiska DHS. Haddii waalidka si toos ah uu lacag kuu siiyo, waa in aad u soo dirtaa

xafiiska WAB. **Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo qaarkood ama masaruufka caruurta oo dhanba dib laguugu soo celiyo.** Waxaan ugu yeeraanaa lacagahan masaruufka canuga ee la soo dhexmarsiyo.

Xaddiga masaruufkaaga canuga ee la soo dhexmarsiyo waxay ku xiran tahay "baahidaada aan la buuxin" iyo caddada masaruufka ee lagu siiyay midkooda. Baahidaada aan l abuuxin waxaan ku soo saareynaa aniga oo ku saleyneyna:

- Inta qof ee ay daboosho lacagta lagu siiyo ee aad ka hesho Mudnaanta Qoyska
- Inta ay la eg tahay daqliga kale ee ku soo gala
- Waxaad weydiin kartaa shaqaalaha kiiskaaga ee WAB inta ay tahay caddada baahidaada aanla buuxin.

Macluumaadka Caymiska Caafimaad ee (Medicaid/TennCare Standard):

- Adiga ayaa ka mas'uul ah in aad Caymiska Caafimaad (Medicaid/TennCare Standard) isbaddel kasta ee ku yimaada cinwaankaaga ama daqligaaga.
- Ha u ogolan qof kale in uu isticmaalo kaarkaaga Caymiska Caafimaad ee (Medicaid/TennCare). Waxaa laga yaabaa in dowladda Gobolka ay ku weydiisato in aad dib u bixiso qarashka daaweynta ee qofkaas kale.
- Waxaa laga yaabaa in aad nagala shaqeyso in waalidka maqan uu bixiyo qarashka daaweynta ama caruurtaada caymiskooda.
- Waa in aad dowladda Gobolka u soo gudbisaa lacag celin kasta oo laguu siiyay daaweyntaada ee horey ay u bixisay Caymiska Caafimaadka ee (Medicaid/TennCare Standard). Sharci ahaan lacagta dowladda Gobolka ayaa iska leh. Haddii aadan dowladda Gobolka gacanta u soo gelin, waxaa laga yaabaa in aad lumiso manfaca TennCare, dambina lagugu soo eedeeyo, oo maxkamadda lagaa dacweeyo si aad lacagta u soo celiso.
- Haddii Xafiiska Baarista ee Tennessee, Xafiiska Ilaaliyaha Guud, ama hay'ad kasta ay kaala soo xiriirto waxyaabo ku saabsan khiyaamo ama ku-tagri fal ah Caymiska Caafimaadka (Medicaid/TennCare Standard), waa in aad na caawisaa.
- Caymiska Caafimaadka ee (Medicaid/TennCare Standard) waa in ay wadaagtaa macluumaadka shaqsi iyo dhaqaale si ay u socodsiiso barnaamijkeeda. Waxa kaliya ay wadaagaan inta sharciga uga baahan yahay ama uu fasaxayo. Qof kasta ee arka macluumaadkaaga waa in uu raacaa sharciyada dowladda gobolka iyo dowladda dhexe ee ku saabsan asturaada ah xifdinta macluumaadkaaga.
- Haddii aan ubaahan nahay in aan urrurino macluumaad caafimaad si aan u ogaano haddii aad heli karto ama aad sii haysan karto Caymiska Caafimaadka (Medicaid/TennCare Standard), waxaan ku siin doonaa foom u gaar ah sii deynta HIPPA (a HIPPA release) kasoo inoo ogolaanayo in aan weydiisano macluumaadkaaga caafimaad

- Haddii aad guri ku leedahay ama aad ku jirto kontaraad guri ee ku yaala meel ka baxsan Gobolka Tennessee, waxaa laga yaabaa in aadan manfacyada aadan xaq u la'hayn.
- Haddii aad gargaarka dad-weynaha ka qaadato meel ka baxsan Gobolka Tenneesee anaan ka ahayn manfacyada baagamuudada, xaq uma lihid in aad qaadato Caymiska Caafimaadka ee (Medicaid/TennCare Standard).
- **Waa in aad na soo wargelisaa is baddel kasta oo ku saabsan macluumaadka aad siisey xafiiska WAB toban (10) maalmood gudahooda marka uu is baddelka uu dhaco.** Tani waxaa ka mid ah isbaddelka cinwaanka, tirada qoyska, hanti, shaqo, daqli, xaaladdaada guur, xaq u la'haanshaha ka qeyb

qaadashada barnaamijka Caymiska Caafimaad ee (Medicare), ama helista caymiska caafimaadka ee koox.

- **Caymiska caafimaadkaaga TennCare lacag ayuu gobolka ugu fadhiyaa, haddii aad ceymiska isticmaasho iyo haddii kaleba.** Sababtaas ayaa lagaaga baahan yahay in aad 10 maalmood gudahooda nagu soo wargeliso isbadelada. Waan eegi doonnaa haddii aad weli heli kartid caymiska caafimaadka Medicaid/TennCare ee Caadiga.
- **Isla markiiba u sheeg shaqaalaha kiiskaaga isbaddel kasta. Marka warbixinta isbaddelada boosto ugu soo dir xafiiska maxalliga ee DHS sodon (30) maalmood gudahooda marka isbaddelka uu dhacay.** Soo raaci nuqdooyin ah warqaddaha aad ku taageereyso warbinta isbaddelada ee aad soo direyso. Haddii aad ku guul dareysato in waqti go'aan aad ku soo wargeliso isbaddelada, waa in aad dib u bixisaa TennCaree manfacyo kasta oo si aanan habooneyn magacaaga loogu bixiyay iyo/ama qeybta adigu aadan bixin.
- Haddii aad haysato caymiska daboola ee Caymiska Caafimaadka ee (TennCare Medicaid), waa in aad xafiiska WAB (DHS) ula socodsiisaa goorta aad hanti iska iibiso ama aad bixiso. Sidoo kale waan in aad DHS u sheegtaa goorta aad qaadato deenta guryaha ama deenta loo qaato guryaha aad iska leedahay.
- **Waa mid sharci ka soo horjeeda in aad xaqiiqada been ka sheegto ama aad qarido arjiga aad buuxinayso ama inta lagu guddi jiro wareysigaaga.** In aad been ka sheegto ama aad qarido xaqiiqooyinka sida daqligaaga, halka aad ku nooshahay, ama noocyada kale ee caymis ee aad haysato, waxay dhilin karaan in baaritaan sameeyaan Xafiiska Ilaaliyaha Guud.
- Haddii dowladda gobolka ay bixiso qarashka daaweyntaada ama ay bixiso qarashka daryeelka guriga dadka wa weyn lagu xanaaneeyo, **Gobolka waxaa laga yaabaa in ay dib u helaan lacagta lagugu leeyahay. Goorta aad geeriyooto, dowladda Gobolka waxaa laga yaabaa in ay hantida adiga aad leedahay ka qaadato lacagta ay kugu leeyihiin.**

Haddii daqli sanadle ah ama (annuity) aad iibsatay 8 Fibraayo, 2006 ama wixii ka dambeeyey, Xeerka isdhin dhaqaalaha ee (Deficit Reduction Act (DRA)) wuxuu dowladda Gobolka Tennessee uga baahan yahay in uu:

- Magacaabo dhaxlaha harey ee qeybta koowaad ugu yaraan isu-geyn caddada gaargaarka caafimaadka ee la bixiyay; **ama**
- Magacaabo dhalaha labaad ee qeybta labaad haddii uu jiro say/xaas jaaliyad iyo/ama canug yar oo ilaal daran.

Sida hoos timaada marxaladdaha qaarkood, iibsashada daqli waxaa loo qiyaasan karaa sida hanti dheeraad ee ka yar qiimaha suuqa uu ka jooga oo tani waxaa dhici karta in ay saameyso in aad heli karto Caymiska Caafimaadka (TennCare) ama Medicaid iyo in kale. Shaqaalaha kiiskaaga wuxuu awoodi karaa in uu ku siiyo faahfaah ku saabsan daqliga dheeraad ee ka yar qiimaha suuqa.

Ma dooneysaa in aad dalbato si aad u codeyso doorashada xigta?

Sharciga dowladda dhexe iyo kan gobolba wuxuu inooga baahan yahay in aan weydiino haddii aad dooneyso in aad iska diiwaangeliso si aad u codeyso. Waa in aan ku weydiinaa su'aashan mar kasta oo aad manfaco dalbaneyso ama aad dib u dalbaneyso, markadib laguugu ogolaado manfacyada, ama haddii inoo soo wacdo in aad inoo sheegto in aad guureyso. Anaga ayaa kaa caawin doonaa in aan kula dhameystirno ama kula buuxinno dhamaan foormamka.

Macluumaadka Diiwaangelinta Codeynta:

- Manfacyada laga yaabo in aad ka hesho xafiiska WAB isma baddeli doonaa haddii aad isdiiwangeliso in aad codeyso ama in kaleba.

- Waan kaa caawin karnaa in aad buuxsato. Go'aanka ah in aad caawinaad hesho adigaa iskaleh. Foormka si qarsoon aad u buuxin kartaa.
- Waxaad cabasho u dirsan kartaa the Coordinator of Elections, Secretary of State's Office, 900 William R. Snodgrass Tennessee Tower, Nashville, TN 37243, 1-615-741-7956, Tennessee Relay Center, 1-800-848-0299, haddii aad aaminsan tahay in:
    - Qof faragalin ku sameeyey xuquuqdaada ah in aad isdiiwaangeliso ama qof kuu diidey in aad isdiiwangeliso si aad u codeyso.
    - Qof faragalin ku sameeyey xuquuqdaada ah qarsoodiga oo kuu diidey in aad isdiiwangeliso si aad u codeyso.
- Haddii aad doorato in aad isdiiwaangeliso ama diido, uma sheegi doono cid ka baxsan guddiga doorashada arrinka ah dalabkaaga ama halka aad ka buuxisay. Tani waxa kaliya aanu usameyn doonaa diiwaangelin awgeed.
- Ma codeyn kartid ilaa aad ka hesho kaarka diiwaangelinta codeynta. Haddii kaarka aadan ku helin seddex sitimaan gudahood, ka xaqiiji Guddiga Doorashada.
- Guddiga Doorashada Degmada ayaa fiirin doonta haddii aad isdiiwaangelin karto si aad u codeyso. Tani laguma **sameyn** karo xafiiska WAB ama Xafiiska Caymiska Caafimaadka (TennCare).
- Haddii arjigaaga aad u dirtay xafiiska doorashada ee degmadaada, marka ugu horeyso ee aad codeyneyso waa in si shaqsi ahaan aad u tagtaa oo aad u codeysaa.
- Waxaan boostada kuugu soo diri doonaa foormka "Arji Boosto ee Isdiiwangelinta Doortaha" 30 maalmood gudahooda haddii aad telfoon inoogu sheegeyso ama internetka ingoogu soo gudbineyso:
    - Cinwaan baddelka
    - Arji
    - Dib ubuuxiinta
    - Dib ucusbooneynta
    - Dib-u-eegid

Haddii waqtiga la isdiiwaangeliyo in ka dhiman tahay in ka yar 30 maalmood, foormka waxaan kuu soo diri doonaa 5 maalin gudahooda ama maalinta shaqada ee xigta haddii aad karno.

HIPAA:

Sharciga dowlada dhexe ee **HIPAA** wuxuu qorayaa waa in aan xafidnaa xaqiiqooyinka ku saabsan caafimaadkaaga si qarsoodi ah. Sidoo kale sharciga wuxuu leeyahay waa in aan ku siinaa ogeysiiskan. Halkan waakuwan xeerarka la inooga baahan yahay in aan raacdo in aan u xafidno xaqiiqooyinka ku saabsan caafimaadkaaga qarsoodiga. Xeerarkan way isbaddeli karaan. Haddii isbaddel muhiim ah la sameeyo, anaga ayaa kuu sheegi doona.

Si loo go'aansado xaq u yeelashadaada Caymiska Caafimaadka (TennCare), WAB waxaa laga yaabaa in ay macluumaadka caafimaadkaaga qarsoodiga ah la wadaagto:

- Qaar ka mid ah shaqaalaha Waaxda ee u baahan si ay u go'aamiyaan haddii aad heli karto TennCare; iyo
- TennCare.
- Sidoo kale DHS waxaa laga yaabaa in ay macluumaadkaaga caafimaadka qarsoon la wadaagto Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka ee dowladda dhexe maxaa yeeley waxay bixiyaan oo ay kormeeraan barnaamijka Caymiska Caafimaadka (TennCare).

Adigoo idin <u>hore oo qoraal ah</u> lagaa hayo, xafiiska DHS waxaa laga yaabaa in macluumaadkaaga caafimaadka ee gaarka ah ay la wadaagaan shaqsiyaad kale ama xarumo, sida: Shaqaalahaaga daryeelka caafimaadka, qareen, xubnaha qoyskaaga.

Haddii aadan awoodin in aad bixiso idin <u>hore oo qoraal ah,</u> xafiiska WAB waxaa laga yaabaa in ay macluumaadkaaga caafimaadka gaarka ah la wadaagto:

- wakiilka awoodda loo siiyay—kaasoo sidoo kale xaq u leh in uu bixiyo idin qoraal ah ee lagu sii daynayo macluumaadkaaga caafimaadka shaqsiga ee la siinayo shaqsiyaad kale ama xarumo;
- Xubin qoyska ama kuwo kale ee ku lugta leh daryeelka caafimaadkaaga. Waad na weydiin kartaa in aanan iyagu usheegin macluumaadkaaga. Waan isku raaci karnaa haddaan karno. Haddii aad tahay canug yar ama aad ku jiro qolka emerjensiga, waxaa dhici karta in aanan isku raacin.

Idin hore la'aan, DHS waxaa sidoo kale laga yaabaa in ay macluumaadkaaga caafimaad la wadaagto:

- Hay'adda kor ka ilaalida caafimaadka ama sharci fulinta sida sharciga uga baahan yahay ulajeedaduna tahay baaritaan xatooyo ama eeddeyn khiyaamo la xiriira helitaanka manfacyada barnaamijka.
- Shaqsi ama xun kale oo kasta, oo ay ku jiraan sharci fulinta iyo hay'addaha dowladda kale, marka sharciga uu ugol yahay ama marka uu uga baahan yahay oo ay maxkamadda amarto.
- Shaqsi kale ama xarun ee ay ulajeedaduna tahay baaris, sharcigana u ogolaado.

XUQUUQDA KU SAABSAN MACLUUMAADKA CAAFIMAADKAAGA
Waxaad xaq u leedahay in aad:

- Aragto diiwangelinta caafimaadkaaga, aysan ka ahayn marka sharciga uu xadido.
- Aad heso nuqdooyin diiwangelinta caafimaadkaaga, aysan ka ahayn marka sharciga uu xadido.
- Inagala hadasho sida aan u isticmaali doono ama aan u wadaagi doono macluumaadka caafimaadkaaga.
- Na weydiiso isbaddel ah macluumaadka caafimaadka ee ay kula tahay in uu qaldan yahay. Waa in aad iyada oo qoraal ah na weydiisaa in aan baddelno oo aad noo sheegtaa sababta. Waxaa dhici karta in aanan awoodin in aan baddelno. Haddii inagu aanan baddeli karin, waan kula soo socodsiin doonaa sababta.
- Waxaad heli kartaa kuwa aan la wadaagnay macluumaadka caafimaadkaaga inta ka dambeysa 14 Abriil, 2003. Waa in aad si qoraal ah noo weydiisataa. Diiwaangelinta waxaa ku qornaan doonaa ilaa iyo 6 sano codsashada ka hor. Diiwangelinta ma ahan in ay la socoto kuwa aan la wadaagany macluumaadkaaga si loo go'aanshada xaq u la'haanshaaga TennCare ama maxaa yeeley si qoraal ah ayaad inoo weydiistay.
- Na weydiiso in aan wadaagin qaar ka mid ah macluumaadka caafimaadkaaga ku saabsan. Waa in aad si qoraal ah u weydiisataa. Waa in aad inoo sheegtaa waxa ay tahay xaqiiqada oo aadan u dooneyn in la wadaago. Waa in aad inoo sheegtaa kuwa ay yihiin ee aadan doonayn in aan xaqiiqadaha aanan la wadaagin. Laakiin, waxaa mararka qaar dhici karta in aan kugu raaci karin codsigaaga. Inaga ayaa kuu sheegi doona sababta.
- Waa in aad dib ula noqotaa okeydaada ah wadaagista macluumaadka caafimaadkaaga. Haddii aad saxiixday foorm ogolaansho ah, dib ayaad uqaadan kartaa marka aad doonto. Laakiin, waa in aad si qoraal ah u soo dalbataa. Tani waxba kama baddeleyso xaqiiqo kasta ee aan horeyba u wadaagnay.
- Na weydiiso inaan qaab kale ka duwan aan kula soo xiriirno ama cinwaan ka gedisan. Waa in aad si qoraal ah u weydiisataa.
- Na weydiiso ogeysiiska cusub ee hab dhaqanka qarsoodiga ee WAB.

SU'AALOOYIN ama CABASHOOYIN

Miyaad wax su'aalo ah ka qabtaa ogeysiiskan? Fadlan soo wac 1-888-863-6178. Degmada Devidson (Davidson County) soo wac 313-5790. TTY#1-800-270-1349.

Ma qabtaa wax cabasho ah oo ku saabsan sida wax looga qabtay macluumaadka caafimaadka gaarka kuu ah? Waad soo wici kartaa ama waxaad u soo qori kartaa mid ka mid ah xafiisyada hoos ku qoran si aad su'aalo u weydiiso ama aad cabasho u gudbiso. Ma lumin doontid xaq ulahaanshaaga haddii aad cabasho soo gudbiso ama aad su'aalo weydiiso.

Sida waafaqsan sharciga dowladda dhexe iyo Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA) iyo Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka (HHS), hay'adan waxaa ka mamnuucan in ay takoorta ayada oo sal uga dhigeysa jinsi, midab, asal qaran, lab/dhiddig, da', diin, siyaasad ahaan wax uu qofka aamisan yahay ama la'xaad daro. Hoosida timaada Xeerka Kuubannada Cuntada iyo sharciga USDA, takoorta waa mamnuuc sidoo kale ayada oo loo sal looga dhigo diin ama aaminsanaan siyaasad.

Si aad u soo gudbiso cabasho takoor, la soo xiriir USDA ama HHS. Adiga oo u soo qora USDA, Director, Office of Civil Rights, 1400 Independence Avenue, S.W., Washington, DC 20250-9410 ama soo wacl (800) 795-3272(cod ahaan) ama (202) 720-6382 (TTY). Usoo qor HHS, Director, Office for Civil Rights, Room 506-F, 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201 ama ka wac (202) 619-0403 (Cod ahaan) ama (202) 619-3257 (TTY). USDA iyo HHS waa loo shaqeeye fursadda u wada sima shaqaalaha iyo kuwa bixiya.

Sidoo kale waxaad u soo qori kartaa Tennessee, DHS, Office of General Counsel, Citizens Plaza Building, 400 Deaderick Street, Nashville, TN 37243, (615) 313-4700.

Xuquuqdaada dhegaysi hufan:
Maxay tahay haddii aadan ku raacsanayn waxa aan go'aaminay arjigaaga ama kiiskaaga? Racfaan ayaad ku dalban kartaa dhegaysi hufan. Adiga nafsi ahaantaada ayaa ka hadli kara dhegaysiga. Sidoo kale waxaad la iman kartaa saaxiib, qaraabo, ama qareen adiga kuu hadla. Ka dib markaad naga warhesho, waxaad heysataa 90 maalmood in aad racfaan ka qaadato manfacyada Mudnaanta Qoyska iyo Kuubannada Cuntada, iyo 40 maalmood si aad racfaan uga qaadato go'aanka Caymiska Caafimaadka (Medicaid/TennCare Standrad). **Haddii aad dooneyso in aad sii wadato manfacyada inta racfaankaaga go'aan laga gaaraya, waa in aad 10 maalmood gudahooda soo weydiisataa Mudnaanta Qoyska iyo Kuubannada Cuntada iyo 20 maalmood gudahooda soo weydiisataa Caymiska Caafimaadka (TennCare/Medicaid). Haddii aad racfaanka ku guulaysan weydo, waxaa laga yaabaa inaad dib u bixiso manfacyada aad heshey ama qaadatay inta ay socdeen howsha racfaanka ee la go'aaminaayay.** Haddii aad dooneyso in aad racfaan qaadato, u sheeg shaqaalaha kiiskaaga ee xafiiska WAB. Sidoo kale Xarunta Adeegga Gaargaarka Qoyska oo aad ka soo wici kartaa 1-866-311-4287. Tani waa wacid bilaash ah.

Idan lagu sii daynayo diiwaangelinta isa soo xaadirista iskuulka:

Aniga (macmiilka) waxaan iskuulka aan idan u siinayaa in ay bixiyaan diiwaangelinta soo xaadiritaanka caruurteyda ee la socda arjigaaga la siiyo Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee oo ay bixiso Waaxda Waxbarashada ee Tennessee ama iskuulka canugayga. Waaxda Adeega Aadanaha wuxuu diiwaangelintan uu u isticmaali doonaa, oo ay ku jirto lambarada soshal sekiyuuritiga, in uu iga caawiyo in ka soo baxo waajibaadyadeda Mudnaanta Qoyska iyo diiwangelinta waa la baabi'in doonaa ka dib markii la dhamaysto.

Idan la igula soo xiriir karo:
Waa kugu raacsanahay in WAB ila soo xiiri karo ayaga oo isticmaalaya Boostada Mareykanka iyo telfoon ee cinwaanka iyo lambarka ku qoran arjigeyga, oo fariin ii dhaafi karaa haddii aanan aniga markaa la helin, sida looga baahan yahay in aan bixiyo macluumaad ku saabsan arjigeyga ah manfacyada/adeegyada ama manfacyada/adeegyada ee aan horeyba u helo.